

## Talooyin loogu talogaley qofka ka baxaya isbitaalka oo galey qaliin lagaga saarayo ilmo-galeenka/minka iyada oo la adeegsanayo hab qaliinka daloolinta (titthålskirurgi)

Waxaa qaliin lagaga saarey ilmo galeenka iyada oo la adeegsanayao hab qaliinka daloolinta (laparoskopii).

### *Tolmo*

Waxaa maqaarka kaaga jira xadhig tolmo, kaas oo ay kaa saari doonoto kalkaalista caafimaadka ee degmada maalinta 5-aad ilaa maalinta 6-aad.

Waxaa kugu jira xadhig tolmo oo isagu iskiis iskaga soo bixi doona mudo dhowr todobaad gudaheeda ah. Haddii uu ku dhibayo xadhiga afkiisa hore adigaa ayaa ka jarai kara afka hore qiyaastii mudo hal todaad ah qaliinka ka dib.

Faashada ku xidhan naburka meesha lagaa qalay waxaad ka tuuri kartaa todobo maalmood ka dib qaliinka.

### *Dhiigbax*

Dhiigbax aan wax xanuun ah lahayn waa mid yimaada oo iska caadi ah qaliinka ka dib. Ilmo galeenka waa laga saaraa qofka laakiin ilmo galeenka afkiisa hore (livmodertappen) lama saaro. Dhiigbaxyo yar-yar oo ka imanaya ilmo galeenka afkiisa hore (livmodertappen) baa iman kara mudada ugu horeysa ee qaliinka ka dib.

### *Galmada iyo wada noolaanshaha*

Fursada ah in la wada noolado isla markaana la isku galmoon karo isma badali doonto qaliinka ka dib, waxaase haboon in la sugo in la isku galmoodo mudo ilaa 4-6 todobaad ah. Si xididk la qaley ee ku yaala sillka korkiisa u bogsado

### *Cuntada*

Cuntada waxaa loo cuni kraa siddii caadiga ahayd. Laakiin haddii calooshu ku adkaato waxaa lagugula talinayaa in aad isticmaasho midho caloosha lagu dahqaajiyo oo magacooga la yidhaa (katrinplommon), linfrö iyo buushiga ama qolfta sarreeanka (vetekli). Ka fikir sidoo kale in aad cabto cabitaan badan.

### *Jimicsi jidbeed oo fudud*

Waxaa aad bilaabi kartaa in aad banaanka ku soc-socoto marka isbitaalka aad ka baxdo.

### *Jimicsi jidbeed waxoogaa yira culus*

Jimicsi, qoob ka ciyaas, jamnaastiig iyo orod waxaa la sameyn karaa 1-2 todobaad ka din qaliinka

### *Qaadida waxayoobaha culus*

Wax xadeyn ah ma jiraan.

*Dabaal iyo qubeys*

Waa la qubeysan ama la maydhan karaa markii la rabo. Saxan lagu qubeysto iyo barkada lagu dabaasho ee gudaha iyo banaankaba waxaa wanagsan in la joogo 10-14 maalmood qaliinka ka dib

**La xidhiidh mar kasta isbitaalka haddii ay qandho/xumad ku qabto, aad dhiig baxdo ama ay xanuunku kugu kordh!**

Qaliinka waxaa mar kasta la socda haliso, tusaale ahaan infakshan, dhiig bax, dhiiga xinjirow ama xubin jidka ka mid ah oo dhaawac soo gaadho **Sidaa aawdeed waa in aad mar kasta la xidhiidhaa isbitaalka haddii ay qandho/xumad ku qabto, aad dhiig baxdo ama ay xanuunku kugu kordho.** Maadaami kuwaasi ay noqon karto calaamado in ay dhibaato qaliinku sababey ay jiraan. Waxaa aad lambarada telefoonadayada ka heli doontaa khaanadan hoos ku taala.

**Mudootinka lagu gudo jir maalmaha shaqada waxaa aad waceysaa:**

SkaS qaybta qaabilaada ee cudurada haweenka, ummuliso bixineysa talo ummulisda,  
lambarka telefoonka 010-473 92 20

Isniin-jimco: kl 7.00–14.20

Jimco: kl 7.00–11.50

**Wakhtiyada kale ee dheeriga ah waxaa aad waceysaa:**

Iftiimiyaha daryeelka caafimaadka lambarka telefonka 1177

Salaan saaxiibtinimo ku dhechantahay  
Qaybta cudurada haweenka ee isbitaalka Skaraborg